**Xeerka 1da Luulyo 1958, lamba. 8 diw.**

**Taariikh doorashooyinka maamullada**

## Wasiirka Arrimaha Gudaha

Markuu arkay sharciga 7 Maajo 1956, lamba. 1: Dhismaha Xukuumadda Soomaaliya;

Markuu arkay Xeerka 18ka Maajo 1956, lamba. 78: "Nidaamka Xukuumadda Soomaaliya";

Markuu arkay Sharciga 25ka Juunyo 1958, lamba. 15 " Doorashooyinka Maamuleed";

Markuu garwaaqsaday in ay lagama maarmaan tahay in la gooyo taariikhda doorashooyinkaas kor lagu soo sheegay, sida laga dheehanayo Qod. 4aad iyo in lala xiriiriyo Qod. 79aad, ee sharciga la soo xigtay, ee lr. 15;

Markuu la tashaday wasiirka Arrimaha Maaliyadda;

## WUXUU XEERINAYAA

### Qod. 1

Codbixinta xagga doorashooyinka La-taliyeyaasha dowladaha Hoose, oo ku xusan sharciga 25ka Juunyo 1958, lamba. 15, waxa ay ka dhaceysaa dhammaan degaannada "Dhulka, maalinta 20ka Oktoobar 1958.

### Qod. 2

Kharashaadka ka imaanaya dabbaqidda Sharciga kor lgu soo xigtay oo cusleyn doona cutubka 89, ee sanad-maaliyadeedka socda.

### Qod. 3

Xeerkan waxa uu dhaqangelayaa laga bilaabo taariikhda nashrintiisa lagu nashriyo Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1da Luulyo 1958.

Wasiirka

**Muuse Boqor**

Waa Arkay Tix.

Diw. lamba. 10, xaashi lamba. 144

Muqdisho, 1da Luulyo 1958.

Xisaab-dhowraha: **Spadaro**